# Sidee ayeey kuu saameyneysaa caddeyn shisheeye aan la rabin?

Waxa aay Adeegga Migreshanka- iyo Jinsiyadda (IND) ka heshay caddeynta shisheeye aan la rabin. Go'aanka aad heshay waxaa ku taal sababta laguugu qeexay shisheeye aan la rabin. Warqaddan warbixineed waxa aad ka aqrisaneysaa waa maxay caddeynta shisheeye aan la rabin iyo sida ay kuu saameyneyso.

1. Waa maxay caddeynta shisheeye aan la rabin?
2. Muddo intee la eg ayeey jireysaa caddeynta shisheeye aan la rabin?
3. Waa maxay macnaha dignin gelinta ee hab warbixineed?
4. Goorma ayaa astaamahaada shaqsiga laga saarayaa SIS ama E&S?
5. Maxaa dhacaaya markaa haddii aadba Nederland joogto?
6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo caddeynta shisheeye aan la rabin?
7. Goorma ayaad dib Nederland ugu soo safari kartaa?
8. Sidee u codsan kartaa ka dul qaadis (ku meel gaar ah) ee caddeynta shisheeye aan la rabin?
9. Maxaad yeeleysaa haddii aad su'aalo qabto?

## 1. Waa maxay caddeynta shisheeye aan la rabin?

Caddeynta shisheeye aan la rabin waxaa ku taal in aan Nederland lagaa rabin. Waxaa lagu siinayaa caddeynta shisheeye aan la rabin marka ay IND go'aamiso in aad adiga khatar ku tahay Nederland. Waa xeer nidaameed lagu qaado dadka inta badan galay fal ciqaab mudan. Inta badan kaasi waa fal dembiyeed. Caddeynta shisheeye aan la rabin awgeed waa in aad isla markaaba Nederland ka tagtaa. Keddibna Nederland marna dib uma soo geli kartid. Waxaa caddeyntaada shisheeye aan la rabin laga dignin gelinayaa hab warbixineed. Dignin gelin waxa loola jeedo ka aqriso su'aasha 3aad.

## 2. Muddo intee la eg ayeey jireysaa caddeynta shisheeye aan la rabin?

Caddeynta shisheeye aan la rabin inta badan ma laha muddo ay soo af jarmeyso waxa ayna dhammaaneysaa marka ay IND go'aamiso. Taasi waxay dhici kataa marka aad codsato ka dul qaadis caddeynta shisheeye aan la rabin. Su'aasha 8aad waxaa ku taal sida ka dul qaadista loo codsado.

## 3. Waa maxay macnaha dignin gelinta ee hab warbixineed?

Caddeynta shisheeye aan la rabin awgeed dignin gelin ayaa lagaa sameynayaa. Loo dignin geliyay ama la dignin geliyay waxaa lagu jeedaa in ay dowladda astaamahaada shaqsiga ah ay gelisay hab warbixineed. Ilaalada xadadka iyo boliiska waxay dignin gelintaada ka arkayaan hab warbixineedka in aad tahay shisheeye aan la rabin. Baaritaan keddib waxa aay kaa celin karaan xadka. Kolkaaa ma laguu oggola in aad waddanka gasho. Go'aanka waxaa ku taal habkee lagaa dignin geliyay.

Waxaa jira 2 hab:

- Fulinta & Dignin Gelinta (E&S): kaasi waa hab warbixineed ay boliiska Nederland iyo Ilaalada Boqortooyada ay leeyihiin.
- Hab Warbixineedka Schengen (SIS): kaasi waa hab ay daalacan karaan xad ilaaliyayaasha iyo boliiska waddamada Schengen. Waddamada ka tirsan Waddamada-Schengen ka aqriso barta www.ind.nl/schengengebied ama www.ind.nl/schengenarea.

Waxaa un lagaa dignin gelin karaa 1 hab.

## 4. Goorma ayaa astaamahaada shaqsiga laga saarayaa SIS ama E&S?

Haddii aad soo codsato ka dul qaadis rigli ah oo caddeynta shisheeye aan la rabin markaana codsigaasi lagaa oggolaaday.

### 5. Maxaa dhacaaya markaa haddii aadba Nederland joogto?

In aad Nederland joogto ciqaab ayeey mudan tahay. Waxaa lagu xabbisi karaa muddo ugu badnaan 6 bilood ah ama waxa lagu siin karaa ganaax lacageed oo dhowr kun oo yuro ah. Taasi waxay ku taal qodob 197 ee Buugga Sharciga Xeerka Ciqaabta.

### 6. Maxaad sameyn kartaa haddii aad ka soo hor jeeddo caddeynta shisheeye aan la rabin?

Waxaad dacwad celin geyn kartaa IND. Go'aanka aad heshay ayeey ku taal taasi habka aad u sameyneyso.

### 7. Goorma ayaad dib Nederland ugu soo safari kartaa?

Marka ay IND kaa dul qaaddo caddeynta shisheeye aan la rabin. Taasi waxa ay dhici kartaa oo keli ah marka aad soo codsato ayna IND codsigaada kaa oggolaato.

### 8. Sideed u codsan kartaa (ku meel gaadh ah) joojinta ku dhawaaqida aan la rabin?

Waxaad codsan kartaa in lagaa gul qaado caddeynta shisheeye aan la rabin. Marka ay jiraan xaalado degdeg leh oo aad u muhiim ah waxaad codsan kartaa ka dul qaadis ku meel gaar ah. Si aad ka dul qaadis u codsato waxaad adegsanysaa foomka C*odsiga ka dul qaadista caddeynta shisheeye aan la rabin (deyrada), diidmo u soo safar ama go'aan dignin gelin* (9004 ama 9504) ee ku yaal website-ka. Buux buuxi una dir kaasi IND.

Qof kale xitaa waa uu kuu soo codsan kara ka dul qaadista. Qofkaasi waa in aad markaa si dhaxal gal ah u wakiilataa si uu magacaada ugu hawl galo. Waxaad taasi ku caddeyneysaa saxiixa aad foomka saareyso. Taasi waxaa loo yaqaan awood siin.

### 9. **Maxaad yeeleysaa haddii aad su'aalo qabto**?

- Soo booqo website-kenna barta www.ind.nl/inreisverbod ama www.ind.nl/en/entry-ban.
- Soo wac leynka warbixinta ee IND +31 88 043 04 30. Nambarkaa waxaa la heli karaa ka bilow isniin ilaa iyo jimce inta u dhexeysa saacadaha 09.00 ilaa iyo 17.00 saac.

*Nuxurka shaacintaan wax xuquuq ah lagama dhaxli karo. Haddii tarjumista ay horseeddo faraq macnaha oo kala duwan, waxaa kolkaa la tixraacaya nuqulka af nederlandiiska. Qeyb qoraal soo saaristan ka mid ah waa la adeegsan karaa iyado oo la sheegaayo assalka halka laga soo xigtay.*